DEPARTMENT OF HEALTH

# Injirta Madaxa

## Waa maxay injirta madaxa?

Injirta madaxa waa cayayaan dadka ku dhasha. Cayayaankan yaryar (qiyaastii 1/8” [sideed meelod meel] dhererka ah) waxay ka dhigtaan gurigooda timaha bini-aadan waxayna quutaan dhiigga. Injirta madaxu si dhakhso ah ayey u tarantaa, iyadoo dhalaysa ukun yaryar oo midab cawlan leh oo sida beedka ah kuwaasi oo ay ku dhajiyaan gunta timaha, oo qolofta madaxa u dhaw. Injirta madaxa laguma oga inay cudur faafiso.

## Yay injirtu madaxa ka gali kartaa?

Qof kasta wuu yeelan karaa injirta madaxa. Ma aha calaamad muujinaysa inaad uskag tahay. Dadka intooda badan ma oga inay injir leeyihiin ilaa ay arkaan qindhicilka ama injirta. Waxaa laga helaa adduunka oo idil, inta badan carruurta.

## Sidee injirta madaxu ku timaad?

Injirta madaxu ma laha baalal oo ma duusho ama booddo, laakiin way guurguurataa ama dhex carartaa timaha si dhakhso ah. Inta ugu badan, injirta madaxu waxay ku faaftaa istaabasho toos ah oo madax-ilaa-madax ah ee qof leh injirta. Waxa kale oo laga yaabaa inay ku faafto iyadoo la wadaago waxyaabaha qofku gaarka u leeyahay, sida shanlada, burushyada, ama waxyaalaha timaha lagu daryeelo, tuwaalada, barkimooyinka, koofiyadaha, iyo waxyaalaha madaxa la saarto. Eeyda, bisadaha, iyo rabbaayadaha kale ma faafiyaan injirta madaxa.

## Maxay yihiin astaamaha in qofku leeyahay injirta madaxa?

Si dhaw uga fiiri qindhicil salka timaha ee gadaasha madaxa iyo qoorta iyo dhagaha xaggooda dambe. Qindhicil waa inaan lagu qaldin ururka buufinta timaha, axalka timaha, ama toxobta, kuwaasi oo si dhib yar timaha uga gu'i kara; qindhicil sidaas ma aha sababtoo ah aad ayuu ugu dhaggan yahya timaha qofka.

Mid ka mid ah calaamad muujinaysa injirta madaxa waa cuncun joogto ah ee madaxa, kaas oo mararka qaarkood ay la socoto calaamado xoqitaan ama wax u muuqda finan.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan baaritaanka injirta madaxa, wac dhakhtarkaaga.

## Sidee u daawaysaa injirta madaxa?

Daawaynta lagu taliyey waxaa ka mid ah isticmaalka daawada bilaa dhakhtarka la isticmaalo (OTC) ama daawada dhakhtarku qoro (oo injirta madaxa lagu laayo). Daawaynta injirta madaxa ee wax-ku-ool ah waxaa ka mid ah waxsoosaarka sida:

- “Nix” oo ah giriim jilicsan oo dhakhtar la'aan la isticmaalo oo ay kujirto permethrin, oo ah cayayaan-dile samays ah.
- Noocyo badan oo ka mid ah waxsoosaarka shaambo ku salaysan pyrethrin (“Rid,” “R & C,” “Triple-X,” iwm) kuwaas oo sidoo kale la heli karo dhakhtar la'aan
- “Ovid,” oo ah daawo dhakhtar qoro oo ay kujirto malathion.

Dhammaan waxsoosaarkan, injirtu waxay ku dhimataa hal isticmaal; hase yeeshee, isticmaal labaad toddoba ilaa 10 maalmood kadib ayaa daruuri ah si loo hubiyo in qindhilku dhammaantii dhintay. Maadaama ay sii badanayso inta jeer ee la soo sheegayo in daawayntu fashilanto waxsoosaarka dhakhtar la'aanta la isticmaalo, hubin inaad si taxaddar leh u raaxdo tilmaamaha oo dhan kuwaasi oo ku yaala jaanta waxsoosaarka oo aad la hadasho bixiyahaaga daryeelka caafimaad haddii injirtu dhiman waydo. Daawooyin kale oo dhakhtarku qoro ayaa jira.

## Waa maxay tusaalooyinka daawaynta kale?

Daawooyin kale oo badan oo kuwa dhakhtar la'aanta la isticmaalo ama kuwa dhakhtarku qoro oo lagu xakameeyo injirta madaxa ayaa jira. In kasta oo ay jiraan macluumaad yar oo xagga cilmiga ah si loo taageero hababkan, daawayn meelmar ah ayaa la soo

sheegay isticmaalka dhawr daawaynood oo kale marka daawaynaha caadiga ah shaqayn waayaan, ama marka ay jirto tabasho kusaabsan sun ahaanshaha isticmaalka soo noqnoqda ee waxsoosaarka lagu xakameeyo injirta madaxa. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ma soo jeedin karto dawaynahan iyadoon caddayn dheeraad ah laga haynin waxtarkooda. Hase yeeshee, waxaan dareemaynaa inay muhiim tahay in la xuso qaar ka mid ah hababka loo isticmaalo.

Daawaynaha kale ee hoos ku taxan waxaa lagu magacaabaa naafsi-diidayaal. Marka la marsado, daawaynta ayaa laga yaabaa in ay neefsiga u diido iyo/ama abuurto meel aan u habboonayn injirta madaxa.

- Axalka baatroolka ah (Vaseline®)
- Mayonnaise
- Saliid (tusaale, qudaar,oliif, ama macdan)

Gurista gacanta loola tagayo qindicilka ee waalidka ama adeegyada xirfadle waxay noqon karaan dheeraad wax-ku-ool ah ama wax beddel u aha daawaynaha daawooyinka dhakhtar la'aanta la isticmaalo ama dhakhtarku qoro.

## Sideed u nadiifisaa bey'adda?

Injirta madaxu kuma noolaan karto dibadda jirka bini-aadanka muddo ka badan laba maalmood. Kuma tarmaan dibada jirka. Kuma noolaadaan rabbaayadaha. Qindhicil kasta oo madaxa ka soo dhacaa ma sii noolaado. In kastoo xakamaynta injirta madaxa badankeeda ay diiradda saarto daawaynta dadka injirtu gashay, waxa jira waxyaalo fudud oo bey'adda laga qaban karo.

- Ku dhaq gogosha biyo kulul (oo ka sarreeya 130 ° F) kuna qallaji qallajiye kulul. Ku dhaq oo qallaji dharka dhawaan la xidhay (oo ay ku jiraan koodhadhka, koofiyadaha, iyo masarrada) heerkul kulul.
- Nadiifi shanlada, burushyada iyo walxaha la midka ah adigoo ku kululaynaya biyo heerkulkood yahay ugu yaraan 130 ° F muddo 10 daqiiqo ah.
- Nadiifi dhulka, roogagga, iyo alaabta guryaha lagu qurxidho adigoo faakuum isticmaalaya. Isticmaalka buufinada cayayaanka disha laguma talinayo.

Dadaallada nadiifinta waa inay dhacaan maalinta daawaynta injirta ugu horraysa iyo mar kasta oo injir nool lagu arko madaxa bukaanka. Xoog saar nadiifinta aagagga iyo shayada qofka injirta leh uu taabtay 48 saacadood kahor daawaynta.

## Sidee ayaad uga hortagi kartaa injirta madaxa?

Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka hubiyaan madaxa carruurtooda injir si joogto ah sanadka oo dhan. Qoysasku ma aha inay ku tiirsanaadaan qof kale si loo eego madaxa ilmaha - tani waxay dib u dhigaysaa daawaynta. Xusuusnaw, haddii hal qof oo qoys, xerada, ama dugsiga kamid ah leeyahay injirta madaxa, ay jirto fursado kuwa kalena ay ku qaadi karaan. Qof walba ka hubsi, isla markaana isticmaal daawo isku mid ah haddii loo baahdo. Dawaynta dadka aan lahayn injir ama qindhicilka ma lagu talinayo.

## Sidee bay dugsiyadu u xakameeyaan injirta madaxa?

Dugsiyadu waa inay ku dhiirigeliyaan waalidiinta inay carruurtooda si joogto ah uga baaraan injirta markay guriga joogaan. Dadaalada baaritaanka ee injirta madaxa ee dugsiyada may muujin inay wax-ku-ool yihiin.

Marka xaalad injirta madaxa ah la tuhmo, waalidiinta waa in lagula taliyaa ugu dambaynta inay ka hubiyaan carruurtooda injir oo daaweeyaan haddii injirtu jirto. Carruurta leh injirta madaxu waxay dhigan karaan dugsiga.

Minnesota Department of Health
Vectorborne Diseases Unit
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164
651-201-5414
www.health.state.mn.us

Head Lice – Somali (4/11/19)

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac 651-201-5414. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyey.*